# Marka Ay La Haraan Cashuurta Gobolka Kaaga Soo Noqon Laheyd

When They Keep Your State Tax Refund

## Maxay Tahay Qabsashada Canshuurta?

Waaxda Canshuurta ee Minnesota waxay kaa qaadi kartaa canshuur celinta kaaga soo noqota cashuurta dakhliga ama tan guriga, ama bakhtiyaa nasiibka, haddii aad lacag ka qabtid Gobolka ama wakiilka Degmada. Waaxda Cashuuraha waxay lacag celintaada u diraysaa wakiilka wax kugu leh. Tan waxaa loo yaqaan “Dib u soo qabashada dakhliga.” Waxaa loo isticmaalaa in

- lagu soo ururiyo bixintii dheeraadka ahayd ee lagu siiyay oo la xiriirtay gargaarka dadweynaha,
- kharajka caafimaadk ee degmada ama cisbitaalada,
- amaahda dugsiga,
- kaalmada caruurta,
- daynta laga qabo hay’adda Guryaha Dadweynaha,
- ganaaxa ama magdhowga dacwad dambiyeed.

## Ma jiraa waqti aysan qaadan Karin lacag celintayda?

Xitaa haddii lacagta lagugu leeyahay, ma qaadan karaan lacag celintaada haddii:

- Dayntaadu haddii ay tahay kharaj caafimaad, **OO** dakhligaaga markii lagu **siinayay daryeelka caafimaadka** uu ka hooseeyay heer gaar ah. Heerkaas waa isbedelaa sannad kasta. Wac Waaxda dakhliga telefoonka (651) 556-3003 ) si aad u ogaato xaddiga dakhliga ee sannadk lagu siiyay daryeelka caafimaadka. Xaddiga dakhligu waxay ku xirrantahay inta qof oo kugu tiirsan oo qoyskaagu ka koobnaa sannadkaas.



- Amaahdaadu waa gargaar dowladeed oo siyaado ah oo lagu siiyey, sida MFIP ama kaalmadda haynta ilmaha (childcare) **WAADNA** aad heli kartaa wali gargaarka dowladda ama SNAP raashin (food stamps). Laakiin way qaadan **karaan** lacag celintaada adigoo weli ku jira gargaarka haddii dheeraad lagu siiyay, waayo been baad sheegatay ama waxaad jebisay sharciyada barnaamijka gargaarka si ula kac ah.

- Waxaad wakiilka la gashay qorshe dib u soo celin ah, waadna wadaa bixinta wixi lagugu lahaa, **oo** qorshahana waxaa lagu sheegay in aysan isticmaalayn dib u soo qabasho.

- Dayntaadu waxay taagnayd wax ka badan 6 sanno. Sharcigaan waxaa jira wax uusan qabanayn (laga reebay). Tusaale amaahda ardaynimada waa lagu qaadayaa dib u soo qabashada xitaa 6 sanno ka dib.

Xaaladaha kor lagu soo sheegay oo dhan, ma qaadan karaan lacag celintaada, laakiin waa in aad taas ugu sheegtaa qoraal.

## Waa maxay ogaysiinta aan helayo haddii ay rabaan in ay qaataan lacag celintayda?

Marka hore gobolka ama wakiilka degmada wuxuu weydiisanayaa Waaxda Dakhliga in ay qaataan lacag celintaada. Markaas 5 maalmood gudohood, gobolka ama wakiilka degmada ee aaminsan in aad lacag ka qabtid waa in ay kuu soo diraan ogaysiin xuquuqdaada. .

Ogaysiintu waxay kuu sheegaysaa:

- Waxa dayntu tahay, tiradeeda, iyo goorta ay dhacday.
- In ay rabaan in ay usticmaalaan dib u soo qabashada
- In aad ka dacwoon kartid daynta iyo in adiga tahay cidda ay la xiriirto dib u soo qabashada dakhliga
  - inaad ka mudici karto lacagta lagaa qabsaday, iyo
  - sidda aad uga mudici karto lacag qabsiga



## Siddee ayaan uga mudici karaa lacag qabsiga?

U qor wakiilka sheeganaya in ay lacag kugu leeyihiin, **ha u qorin** waraaq Waaxda Canshuuraha. Ku qor dusha sare ee warqadda " Racfaan Ka Qaadasho Canshuurta". Si kooban u sharax sabata aysan u haysan karin lacag celintaada.

Sababuhu waxay noqon karaan in:

- Adiga aadan ka qabin wax lacag ah ama
- Xitaa haddii aad qabto lacagta, in dib u soo qabashada dakhliga ay kaa ilaalinayso - arrimaha kor ku xusan.

**Hayso koobi ka mid ah warqadda.** Wakiilku waa in uu helaa warqaddaada 45 maaalmood gudohood ka bilaabata taariikhdii ogaysinta laguu soo diray. Wakiilku waa in uu qabtaa ballan dhegeeysi 30 maalmood gudohood. Uma baahnid garyaqaan, laakiin waad u yeeran kartaa mid haddii aad rabto.

**Xaq uma lihid dhegeeysi haddii uu jiro xukun ama amar maxkamadeed.**

**Haddii aadan ka helin ogaysiis ka hadlaya xaquuqdaadda hay'adda, waa aad ka mudici kartaa lacag qabsiga:**

- Wakiilka u qor oo weydiiso racfaan
- Waqtiga 45-cisho ah ee aad ku mudici karto ma uu bilaabmayo ka hor inta aad ka helayso ogaysiin qoraal ah oo oronaya in hay'addu rabto inay adeegsato lacag qabsi.
- Haddii wakiilku yiraahdo waxaan kuu soo dirnay ogaysiin, laakiin adigu weligaa ma helin, markaas waxaad leedahay dhegeeysi 2da arrimoodba. Midda koowad, dhab ahaan ma heshay ogaysiinta?, midda labaad ma qaadan karaan lacag celintaada?

**Maxaan sameeyaa haddii hay'adda IRS ay qabsato lacagtaydii canshuurta celinta ahayd ee gobolka iiga soo noqon lahayd?**

Haddii deyn canshuur ah ay dowladda dhexe kugu leedahay, waxa ay qabsan kartaa lacagtii gobolka kaaga soo noqon lahayd. Taa waxaa la yiraa "u qaadasho." Haddii ay taasi dhacdo, waxaa aad ka heli ogaysiis Waaxda Canshuuraadka ee Minnesota (Minnesota Department) iyo haya'dda IRS. Haddii aad doonayso inaad ka mudacdo qaadashada lacagtaa, waxa aad u baahan tahay inaad u hogaansanto tilmaamaha ku dul qoran ogaysiiska hay'adda IRS aadna si toos ah ula xiriirto hay'adda IRS. Marmarka qaarkood kamadambaysta in wax la sameeyo ah waxa ay noqon kartaa muddo gaaban oo yar oo 30-cisho ah. Waa muhiim in loo akhriyo dhamaan ogaysiisyada hay'adda IRS si taxadar leh! Xeerarka dowladda federaalka ah waa ay ka duwan yihiin xeerarka qaadashada ee Minnesota. Wac qareen haddii aad qabto su'aalo.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**